Salaamo Qoyska Dugsiga Degmada Gobalka (DCSD),

Waxaan rajeynayaa in qof walba uu yeeshay dhammaad isbuuc badqab oo raaxo leh. Waxaan rabaa inaan ku bilaabo warbsidaha isbuucaan aniga oo ka qaadayo aqioonsiyada la keenay inta lagu jiray kulanka guddiga maanta. Isbuucaan, DCSD iyo Guddiga Waxbarashada ayaa u dabaaldagayo Isbuuca Badqabka Baska Dugsiga Qaranka iyo isbuuca mahadcelinta Darawalka Baska. Waan kuu mahad celinay oo aan kaaga mahadnaqnay darawaliinteena baska oo ka go'naantooda aqoonyahanadeena.

Waxaan sidoo kale tilmaanay Maalinta Aqoonsiga Shaqaalaha Daryeelida Qaranka, taas oo aheyd Oktoobar 2. Daryeelayaasheena waxay u sameeyaan shaqo cajiib ah oo ku haynta dhismooyinka dugsigeena iyo xarumaha nadiif, oo waxay gaareen meel sare oo dhaafsan ku haynta dhismooyinka nadiif iyo jeermisdilaan inta lagu jiray cudurka safmarka. Waan u mahad naqeynaa oo aan uga mahad celinaa daryeelayaasheena dadaalkooda.

DCSD iyo Guddiga Waxbarashada sidoo kale aqoonsado Bisha Wacyigelinta Kansarka Naasaha, Bisha Waxqabadka Xoogsheegsiga, iyo Isbuuca Cilmi nafsiga Dugsiga Qaranka (Nofeembar 8-12, 2021). Hal abuuradaan muhiim ayay u tahay degmada oo waan ku faanaa aqoonsashadooda inta lagu jiro kulanka guddiga bisha.

Aqoonsiga guusha Ardayga

Isbuucaan, waxaan idinla wadaagayaa ardayda sideed Dugsiga Dhexe Chamblee ee Andes Finch. Ardaygaan magnetka ayaa loo xushay sida aqoonyahanka Dhalinta Jack Kent Cooke. Andes waxay aheyd mid ka mid ah 60-ka arday oo laga xushay in ka badan 1,000 arday ee codsaday. Ururka Jack Kent Cooke ayaa ka go'an hormarinta waxbarashada ardayga sida gaarka ah u rajo leh oo qabo baahida dhaqaalaha. Tan iyo 2000, Ururka wuxuu ku abaalmariyay in ka badan $230 milyan oo deeqaha waxbarashada oo in ka badan 2,930 arday oo laga bilaabo fasalka sideedaad illaa dugsiga qalinjabinta, oo ay la jiraan kala talinta waxbarasho dhameystiran iyo adeegyada kale ee taageerada. Hambalyooyin Andes! Waan ku faanaa inaan idinla wadaago ardaygaan cajiibka ah!

Tallaalada Kooxda

Wixii #TeamTuesday isbuuca la soo dhaafay, waxaan siiyay ammaan gaar ah Dhaqtar Myisha Warren, Agaasimaha Fullinta ee Barnaamijyada Faderaalka DCSD. Waad ku mahadsantahay hogaamintaada xoogan, hormarinta guusha waxbarashada, iyo hubinta in aqoonyahanadeena leeyihiin helitaan simman oo illaha looga baahanyahay hormarin!

Badbaadada Bulshada

Waxaan rabaa inaan qirto 56 ee saraakiisheena booliska DCSD oo dhawaan kala qeybgalay kulanka tababarka rabshada aan onleenka aheyn Xarunta King. Kulanka tababarka ayaa laga ogolyahay xafiisyadeena si loo kordhiyo xirfadahooda qilaafka iyo dajinta ee lagu maareynayo xaaladaha kacsan ee dugsiyada ee qilaafyada ardayda, dagaalada, qilaafaadka shaqaalaha, waxyeelada dhismaha, xatooyada, iypo xaaladaha kala duwan ee maalinlaha. Waan ka mahadcelinayaa Waaxyadeena Badqabka Dadweynaha iyo shaqada ay sameeyaan si ay ugu hayaan ardaydeena inay illaalsanyihiin oo badqab yihiin.

Bisha Dhaxalka Hisbaaniga

Way wanaagsaneyd aragtida qaababka hal abuurka ee aqoonyahanadeena, macalimiinta iyo xubnaha shaqaalaha u dabaaldageen Bisha Dhaxalka Hisbaaniga. Waxaan sharfeynaa jiilalka Ameerikaanka Hisbaaniga oo sida wanaagsan u kobciyay wadankeena iyo bulshada. DCSD waa dugsi degmada qorxoon oo kala duwan oo waan u dabaal dagnaa kala duwanaanshaheena. Waad mahadsantahiin dugsiyadeena u dabaaldagay Bisha Dhaxalka Hisbaaniga.

Aqoonsiga Sahanka Bulshada

DCSD ayaa hadeer marayo nidaamka cusbooneysiinta aqoonsiga. Qeyb ka mid ah nidaamkaan waa aruurinta jawaab celinta ka imaaneyso daneeyayaasha. Waxaan kugu casuumeynaa inaad ka qeybqaadatid Sahanka Daneeyayaasha Qoyska iyo Bulshada. Natiijooyinka sahankaan, oo ay la jiraan waxyaabaha kale ee daneeyayaasha, ayaa lagu isticmaalayaa nidaamka cusbooneysiinta aqoonsiga.

Sahanka Daneeyayaasha Bulshada iyo Qoyska ayaa lagu heli karaa luuqadaha xiggo: Amxaaro, Carabi, Bengaali, Burmeesa, Shiineeska, Ingiriiska, Faransiiska, Hindida, Nebaali, Soomaali, Isbaanish, Sawaaxiili, Telugu, Tigriinya, iyo Fiitnaamees. Sahanka waa qarsoodi oo wuxuu qaadanayaa qiyaastii 10 daqiiqo lagu dhameystirayo. Waxaad ka geli kartaa sahanka ciwaanka xiggo: https://survey.sogosurvey.com/r/eY7O00

Baaritaanka iyo Tallaalada COVID

DCSD ayaa martigelineyso rugta caafimaadka baaritaanka iyo tallaalka COVID-19 ee loogu tallogalay shaqaalaha, ardayda iyo bulshada. Tallaalo iyo baaritaan bilaash ah ayaa loo helayaa dhammaan da' walba. Dhacdada xigta ee balansan waa Jimcaha, Okt. 22, laga bilaabo 12 p.m. illaa 4:30 p.m. ee Dhismaha Maamulka iyo Waxbarashada, 1701 Mountain Industrial Blvd, Stone Mountain, GA. Baaritaanka COVID-19 ayaa sidoo kale laga helayaa Xarunta Gaadiidka Doraville, DCSD's Waaxda Gaadiidka, iyo Xarunta Gaadiidka Panthersville. Wixii warbixin dheeraad ah, booqo www.freecovidtesting.us/dekalb.

Hoolka Maamulka ee Qorshaha Mastarka Dhameystiran

DCSD waxay martigelineysaa bishaan kulamada hoolka maamulka ee Qorshaha Mastarka Dhameystiran (CMP). Nidaamka qorsheynta mastarka DCSD waxaa ku jiro qiimeynta dugsiyada oo dhan iyo xarumaha maamulka, sidoo kale sida kaabayaalka lagu taageerayo howlgalka waxbarashada ee degmada. Nidaamkaan waxaa ku jiro xog aruurinta ku saabsan xarumaha dugsiga ee loo isticmaalayo in lagu hormariyo mudnaanada liiska mashruuca xiggo ee Canshuurta Iibinada Iqtiyaariga ee Ujeedada Waxbarashada Gaarka ah ee Deegaanka (E-SPLOST Educational Special Purpose Local Option Sales Tax). Wixii warbixin dheeraad ah iyo fiirinta jadwalka, fadlan riix halkaan.

Hoolkaan maamulka waxay ahaaneysaa kaliya hal fursad oo lagu bixiyo talo iyo jawaab celinta. Waxaan ku rajo weynahay in nidaamka CMP ay naga caawineyso sii wadista dhisida aaminaad iyo daah furnaanta ee kooxda daneeyayaasha balaaran. Waxaan ku jirnaa nidaamka dib u heshiisiinta dhammaan E-SPLOST mashaariicda IV iyo V oo ku faraxsan wadaagista kormeerkeena cusub iyo ku soo wargelinta aaladaha bulshooyinkeena. Waan sii wadeynaa inaan u dhaqaaqno hore iyo kor sida degmada!

Fadlan sii joogtey inaad ka booqatid websaydkeena iyo websaydka dugsigeena oo warbixinta ugu dambeyso ee aqbaaraha degmada. Isbuuc wanaagsan!